

Warbixinta Qiimaynta Khasaaraaha Dadka Rayidka ah ee Taliska Mareykanka ee Afrika

Warbixintii ugu dambaysay ee qiimaynta khasaaraaha rayidka ee saddex biloodlaha ah oo dhammaanaysa Diseembar 31, 2021. Taliska Ciidanka Maraykanka ee Afrika ma helin warbixinno cusub oo ku saabsan khasaaraaha soo gaara dadka rayidka ah, mana jiraan warbixinno furan oo la soo saaray afartii bilood ee lasoo dhaafay. Haatan ma jiraan wax qiimayn ah oo furan ama dib loo eegayo.

Tani waa warbixintii sideedaad ee qiimeynta khasaaraaha rayidka ee saddexdii biloodba mar la soo saaro, iyo markii Taliska Mareykanka ee Afrika uu bilaabay inuu siidaayo warbixinna Abriil 2020 taas oo qayb ka ah sida ay uga go'an tahay kor u qaadista daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka.

Jan. 27, Xoghayaha Difaaca ee Maraykanka Lloyd J. Austin III, waxa uu soo saaray qoraal uu ku hagayo Qorshe Hawleedka Ka-hortagga Waxyeellada Rayidka (afka qalaad markii lasoo gaabsho loo yaqaan - CHMRAP) 90 maalmood gudahooda. CHMRAP waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in Wasaaraddu ay sii waddo hagaajinta habka Waaxda ee yaraynta waxyeelada dadka rayidka ah iyo ka jawaabida cabashooyinka. Waxayna ku wargelin doontaa dhamaystirka soo socda ee Tilmaamaha Wasaarada Difaaca Maraykanka oo ku saabsan Waxyelelaynta iyo Jawaabcelinta Waxyeelada Dadka Rayidka ah.

"Ilaalinta dadka rayidka ahi ee aan waxba galabsan ayaa ah udub dhixaadka hawlgalladayada taas oo kor u qaadaysa amaanka iyo xasilloonida Afrika", ayuu yiri Gen. Stephen Townsend, oo ah taliyaha ciidamada Mareykanka ee Afrika. Wuxuu ku daray, "Waxaan leenahay waajibaad ku saleeysan sidii geeddi-socodkayagu u ahaan lahaa mid ku saleeysan sidii loo yarayn lahaa waxyeellada dadka rayidka ah."

Taliska Mareykanka ee Afrika waxa uu si dhab ah u qaadaa dhammaan warbixinada suurtagalka ah ee ku saabsan in dadka rayidka ah aanan wax dhibaato ah lagaar siin, taasoo leh hannaan lagu sameeyo qiimeynta dhabta ah iyadoo la adeegsanayo dhammaan macluumaadka la hayo. Talisku waxa uu sii wadi doonaa ilaalinta iyo hagaajinta barnaamijka Qiimaynta Khasaaraaha Rayidka, waxana uu sii wadi doonaa in uu dib u eegis iyo qiimayn ku sameeyo warbixin kasta oo waxyelo u geysan karta dadka rayidka ah. Warbixintani waxa ay ka tarjumaysaa wararkii hore ee khasaaraaha rayidka ee aan la hubin ee lagu sheegay warbixinada Qiimaynta Khasaaraaha Rayidka sadex-bilood ka hor.

Wararka la xidhiidha: Waaxda Difaaca oo soo saartay qoraal ku saabsan hagaajinta waxyeelada rayidka iyo ka jawaabista

Daabacaada la xidhiidha: Qoraalka Wasaaradda Gaashaandhigga ee ku saabsan Hagaajinta Waxyeellada dadka rayidka ah iyo wax ka qabashada yareeynta qasaaraha soo gaara dadka rayidka ah

Wararkii Ugu Danbeeyay Qiimaynta Khasaaraaha Dadka Rayidka ah ee Taliska Mareykanka ee Afrika.

Warbixintani waxa ay ka tarjumaysaa wararka ku saabsan warbixinada qiimaynta khasaaraaha rayidka ee saddexdii biloodba mar la sii daayo.

Warbixinta Qiimaynta Khasaaraaha Rayidka ah ee Taliska Maraykanka ee Afrika Ugu Horraya Warbixinta Sadex Biloodlaha ah.

March 18, 2019 AFRICOM ayaa heshay labo eedeymo oo laga helay ilo qadka war baahineed ee internet-ka oo sheegaya in saddex ilaa afar (3-4) dad oo rayid ah lagu dilay duqeyn uu Mareykanku ka geystay agagaarka Afgooye, Soomaaliya, Maarsio 18, 2019 .

Warbixin ee la xidhiidha Waxyeelada rayidka:

<https://www.africom.mil/pressrelease/32740/initial-us-africa-command-civilian-casualty-assessment-quarterly-report>

Warbixin Cusub: Talisku wuxuu akhriyay baaritaankii Amnesty International ay sameeysay, taas oo Talisku uusan qaadicin ama aqbalin in shaqsiyaadkaasi ahaayeen shaqsiyaad beeraleey ah ama u shaqeeya Shirkada Hormuud. Baaritaan kala duwan oo lasameeyay, duqeeynta ka hor iyo ka diba, waxaan ku soo gabagabeynay inay ahaayeen saraakiil al-Shabaab ah. Intii uu socday howlgalka AFRICOM Sirdoonka, Dabagalka iyo Sahaminta (SDS), waxaa lagu daba jiray gaari cad oo laan-kuruusar ah (SUV) oo qof saaranyahay, qofkaas oo asal ahaan ka soo jeeda tuulo ay maamusho xarakada Al-Shabaab. Intii lagu jiray kormeerka, daba galku waxaa uu arkay sadex isbaaro oo Al-shabaab leeyihiin, laguna arkay dhaqdhaqaqa Alshabaab iyo calankooda oo suran isbaarooyinkaas. Intii lagu guda jiray isbaarooyinkii gaarigu dhex maray, qofkii gaariga saarnaa ayaa gaarigii ka dagay isagoo bilaabay inuu la hadlo qaar ka mid ah xarakada Alshabaab, kadibna waxaa uu kaxeystay labo wiil oo kale oo dhalinyaro ah, kuwaas oo la hubiyay iney ka tirsanaayeen al-Shabaab. Kadib markii ay dhaafeen isbaaradii afaraad (4aad) oo la xaqiijiyay iney Alshabab leeyihiin, sirdoonka Maraykanku waxaa uu sii waday dabagalkii ilaa gaarigii ay saarnaayeen xubnaha Alshabaab laga duqeeyo. Warar kala duwan oo ka soo baxay warbaahinta Soomaalida, iyo isgaarsiinta Hormuud ayaa sheegaya in mid ka mid ah shaqaalahooda aan lagu dilin duqeeyn kadhaday soonahaan haba yaraatee, taas oo meesha ka saaraysa sheegashada wax yeelaynta shacabka, ama in dad rayid ah lagu wax yeeleeyay duqeeyntii lala beegsaday xubnaha Alshabaab. Sirdoonka, Dabagalka, iyo Sahaminta (SDS) Maraykanku waxay sii wadeen u kuur gal joogta ah si loo yareeyo wax yeelo soo gaarta dadka rayidka ah.

Warbixinta Qiimaynta Khasaaraaha Rayidka ah ee Taliska Mareykanka ee Afrika ee rubuc-biloodlaha ah; Rubuca Saddexaad, 2020

February 24, 2020, Taliska Africom ayaa heshay shan eedeymo oo laga helay ilo-wareedyo dhanka internetka ah iyo akoonnada baraha bulshada oo sheegaya in hal (1) qof oo rayid ah lagu dilay duqeeynta Mareykanka ee agagaarka Jilib, Soomaaliya, markeey taariikhdu aheeyd Febraayo 24, 2020.

Warbixin la xadhiidha waxyeelaynta dadka rayidka ah:

<https://www.africom.mil/pressrelease/33045/us-africa-command-civilian-casualty-assessment-quarterly-report-third-quarter-2020>

Warbixin cusub: Taliska ciidamada Mareykanka ee Afrika ayaa garab istaagay duqeynta lala beegsaday ee lagu dilay taliyihii al-Shabaab, Maxamuud Salaad oo hogaaminayay weerarada abaabulan ee ka dhanka ah ciidamada huwanta ah ee gobolka. Kadib markii si toos ah loo aqoonsaday Maxamuud Salaad, sirdoonka, Dabagalka iyo Sahminta Maraykanku waxay sii waday ilaalo joogto ah ilaa laga dhammeeyo duqeynta . Qiimaynta khasaaraha dagaalka ee duqeynta ayaa lagu xaqiijiyay in Maxamuud Salaad aysan cidna la soconin markii lagu dhuftay duqeynta diyaaradaha Mareykanka. Warbixino xiriir ah oo la soo aruuriyay muddo dhowr sano ah ayaa si cad u faah faahisay doorka tooska ah ee Maxamuud Salaad uu ku lahaa howlgallada Al-Shabaab fuliyaan ee ka dhaca gobolka.

Warbixinta Qiimaynta Khasaaraha Rayidka ah ee Taliska Mareykanka ee Afrika ee rubuc-biloodlaha ah; Rubuca 1aad, 2021

Inta u dhaxaysay March 10, 2020, iyo April 1, 2020, Taliska Mareykanka ee Afrika ayaa helay warbixino kala duwan oo laga helay ilo kala duwan oo sheegay in inta u dhaxaysa afar (4) ilaa toban (10) qof oo rayid ah lagu dilay duqeynta Mareykanka ee agagaarka Jannaale, Soomaaliya. Taas oo dhacday March 10, 2020.

Warbixin la xariirta wax yeelaynta dadka rayidka ah:

<https://www.africom.mil/pressrelease/33610/us-africa-command-civilian-casualty-assessment-quarterly-report-1st-quarter-2021>

Warbixin cusub: Taliska Mareykanka ee Afrika ayaa dabagal ku sameeyay gaari ka yimid goob ay ku sugnaayeen Al-Shabaab. Gaariga ayaa ku socday goob labaad oo Al-Shabaab ku sugnaayeen. Waxaa gaariga ka dagay shan (5) ka mid ah hawl-wadeenada Al-Shabaab oo markii danbana dib ugu soo laabtay gaarigii ay wateen. Sirdoonka iyo Sahanka Maraykanku waxay si joogta ah ula socdeen ilaa duqeeeyntu dhacdo, iyadoo laga taxadarayo wax yeelo soo gaarta dadka shacabka ah. Baaritaan lagu sameeyay goobta duqeeeyntu ka dhacday ayaa lagu xaqiijiyay in aysan duqeeeyntu ka dhacin midna labada jid ee caanka ah ee soo gala magaalada Muqdisho. Taas beddelkeeda, duqeeeynta ayaa ka dhacday meel qiyastii 9 KM dhanka waqooyi ka ah jihadka macruufka ah, taasoo hoos u dhigtay suurtagalmimada in gaarigu uu ahaa Taksi u socday Muqdisho. Ugu dambayntii, qiimayntii daba-galka ahayd ee taliska Maraykanka ee Afrika waxa uu sidoo kale ku ogaaday qiimayn lagu sameeyay xog-ururinta, in sawirrada loo adeegsaday warbixinta khasaaraha rayidka, sidoo kale loo adeegsaday warbixinno hore oo dad rayid ah oo ay baahisay Idaacadda Alfurqaan, taas oo hoos u dhigtay kalsoonidii lagu qabay warbixinteeda.

Taliska Ciidamada Mareekanka ee Afrika (AFRICOM) Qiimaynta Khasaaraha Rayidka ee rubaca-2aad 2021-ka.

(Warar aan laxaqijjin), 19-kii Janawari 2021, Taliska Ciidamada Mareekanka ee Afrika waxaa soogaarey hal (1) warbixin oo ka soobaxday khadka warbaahinta oo tabinaysa in ey ciidamada mareekanka ey duqeen dayaarad kudileen 1 qof oo rayyid ah.

Warbixinta laxidhiidha khasaaraha rayidka:

<https://www.africom.mil/pressrelease/33802/us-africa-command-civilian-casualty-assessment-quarterly-report-2nd-quarter-2021>

Warbixin Cusub: Taliska ciidamada Mareekanaka u qaabilsan Afrika ee AFRICOM waxa ay ayyidsan yihii duqeynta lala beegsaday ee lagu dilay taliyihii al-Shabaab, Maxamed Cabaas Axmed Diirshe, kaas oo qorsheeyey soona abaabuley weeraro ka dhan ah ciidamada huwanta. Warbixinno xiriir ah, sirdoonna ah, oo soo bilowday 2018 ayaa si cad loogu faah faahiyay doorkiisa tooska ah ee al-Shabaab, oo ay ku jiraan qorsheynta iyo fulinta howlgallada Al-Shabaab ee gobolka.

Farqiga u Dhexeeya Taliska Mareykanka ee Afrika ee Qiimeynta Khasaaraha Rayidka iyo Warbixinnda Ururada aan Dowliga Ahayn (NGOs).

Qiimaynta Taliska Mareykanka ee Afrika ee warbixinnda khasaaraha rayidka ayaa mararka qaar kaga duwan ururada kale, oo ay ku jiraan Ururada aan Dowliga ahayn (NGOs) sababo dhown ah dartood. Xogta talisku waxay ku salaysan tahay ilo sirdoon ah oo aad layskugu halleyn karo oo lakabeeysan iyo warbixin hawlgalo oo sir ah oo aysan heli karin dadweynahu ogaana karin. Tani waxay tusaale u tahay farqiga u dhexeeya natijjooyinka taliska iyo kuwa kale ee qolooyinka kale kasoo baxda.

Qeexida Rayyidka iyo Dagaalayahanada

Iyadoo Laraacayo Sharciga u Yaal Dalka ee Xeerka Waaxda Difaaca, "Shacab" iyo "dagaalyahan" waxaa lagu qeexay sida soo socota:

Rayid: Dadka aan dagaalyahannada ahayn (xubnaha militariga/ciidamada amniga ama xubnaha mid ka mid ah xoogagga cadawga lagu dhawaaqay ama koox hubaysan oo abaabulan oo dhinac ka ah dagaal hubaysan). Dadka rayidka ah waxaa laga yaabaa inay unuglaadaan weerarrada haddii ay muujiyan ujeedo colaadeed, ku lug leh fal cadowtinimo, ama waqtigaas oo ay si toos ah uga qayb qaadanayaan dagaalka; laakiin waxay sii haysanayaan ama dib u helayaan ilaalintaas marka ay joojiyaan rabshadaha ama dhaawacmaan, bukoonaadaan, la xidho, ama ay is dhiibaan, oo ay markaas awoodi waayaan inay sii wadaan dagaalka. Dhamaan shaqaalaha ku sugar aagga mas'uuliyadda ee Taliska Mareykanka ee Afrika waxay mas'uul ka yihii ilaalinta dadka rayidka ah, haddii aan dadkaas iyaga ah loo aqoonsan inay ka midyihii bartilmaameedyo militari.

Dagaalyahan: Dadka sida tooska ah uga qayb qaadanaya iskahorimaad hubaysan, ama dadka ficiadooda colaadeed ay si ula kac ah agab ahaan u taageera colaadaha ka dhanka ah shakhsiyadka Maraykanka ah. Sidoo kale si rasmi ah ama hawl ahaan uga tirsan koox hubaysan oo aan Dawli ahayn oo ku hawlan dagaal, waxa laga dhigi karaa bartilamaameedka sababtoo ah waxay la wadaagaan ujeeddada colaadeed ee kooxaha dagaalamaysa.